

٢٣ ذوالقعدة ١٤٤٠هـ
٢٦ من يوليو ٢٠١٩م

جمهورية مصر العربية
وزارة الأوقاف

النفع العام في ميزان الشرع الشريف

Manfacada guud marka la saaro miisaanka sharciga qiimaha badan

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَىٰ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ)

(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo)

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Qofka fiirfiirinaya axkaamta shareecada islaamka wuxuu ogaanayaa inay u timid dadka iyo dalka maslaxaddooda, iyo kor u qaadidda nafta aadanaha, in la geeyo meelaha ugu sarreeya, waxkastoo dadka u keenaya waxtar guud waa oggol yahay sharciga xitaa hadduusan kusoo aroorin nas cad, waxkastoo dhibaya dadka maslaxaddooda guud sharciga sal kuma laha.

Diinta islaamka xaniifka ah ma garanayso kelinimo iyo nafjeclaysi iyo iyo salbiya, sidoo kale ma garanayso in laga hormariyo maslaxadda gaar tan guud, waxay garanaysaa waxtarka guud iyo siismo dhab iyo isugu kaalmaynta wanaagga iyo taqwada oo ku dheehan jacayl iyo huritaan, si ay bulshada u gaarto hormarka la raadinayo, iyo isbahaysiga la mahdinayo, qofka wuxuu u shaqeynayaa danta guud, qofka iyo bulshadaba wanaag ayay helayaan, muwaadiniinta qalbigooda galaya dareenka inay yihiin hal jir marka ay xubin ka sheegato xubnaha oo dhan waxay dareemayaan dhafar iyo qandho, maxaa ka fiican markuu Showqi yiri:

وَزَالُوا دُونَ قَوْمِهِمْ لِيَبْقُوا	*	بِلَادٍ مَاتَ فِيئْتِهَا لِنَحْيَا
---------------------------------------	---	------------------------------------

Dal dhalinyaradiisa u dhinteen si uu u jiro *
Way suuleen dadkooda iyaga ka soko say u haraan

waxaan shaki kuj jirin kan fiirfiirinaya kitaabka Ilaahay - cazza wajalla - inuu si dhab u ogaanayo ujeedada guud laga leeyahay u jideynta axkaamta dadka, waa xaqiijinta danahooda guud in loo keeno wanaag iyo waxtar, lagana reebo dhib iyo xumaan, Qur'aanka kariimka wuxuu adkeeyay ilaalinta maslaxadda iyo xaqiijinta danta guud inay yihiin waddada rususha iyo anbiyada dhammaan, Ilaahay uma soo dirin nabi iyo rasuul inuu

wanaag u keeno dadkiisa mooye isagoo aan ka sugaynin ijaar ama dan adduunyo, Alle wuxuu leeyahay:

(وَيَا قَوْمِ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مَالًا إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى اللَّهِ)

(Qoomkayow idinka warsan maayo xaqa ujuuro ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Alle), wuxuu yiri asoo ka hadlaya nabi Huud – Ilaahay nabadgelyo korkiisa ha yeelee -:

(يَا قَوْمِ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى الَّذِي فَطَرَنِي أَفَلَا تَعْقِلُونَ)

(Qoomkayow idinka warsan maayo xaqa ujuuro ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Allaha i abuuray ee miyeydaan wax kasayn), waa kanaa khaliiluraxmaan Ibraahim – *nabadgelyo korkiisa ha haatee* -Ilaahay ugu tadarucaya duco caddeynaysa siduu ugu dadaalo waxtarka dadka iyo khayrka inuu u daa'imo isagoo leh:

(رَبِّ اجْعَلْ هَذَا بَلَدًا آمِنًا وَارْزُقْ أَهْلَهُ مِنَ الثَّمَرَاتِ مَنْ آمَنَ مِنْهُمْ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ)

(Rabbiyow ka yeel baladkan (Maka) Aamin igana dheeree ani iyo caruurtayda inaan caabudno sanamyada), sida la og yahay dalka waxaa laga wadaa dadkiisa, wuxuu ugu duceeyay arsaaq oo dadka ka kaafineyso, haddii uu dalka aamin yahay dadka noloshoodana ay helayaan taas dadka waxay ugu kaalmaynaysaa daacada Alle iyo naftooda degan qalbigoodana qabow iyagoo u degdegaya camiridda dhulka iyo hagaajintiisa, wuxuu leeyahay Alle:

(هُوَ أَنْشَأَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا)

(Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa), wuxuu leeyahay Alle:

(وَلَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا)

(Hana fasaadinina dhulka inta la wanaajiyay kadib)

Shareecada nabi muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxay u timid si ay kor ugu qaadi lahayd mabda'an insaaniga wax hagaajinaya ee toosan, si ay u adkeyso qaacidooyinka ilaalinta xasilloonida bulshada iyo hormarkeeda iyadoo la eegayo gaar ahaan waxa ugu manfaca ballaaran, iyo nidaaminta kala mudnaanta, si ay nolosha u toosto una degto, siirada nabiga daahirka ah iyo nolosha saxaabada sharafta leh

waxaa ka buuxa mowqifyo qiime badan oo tusinaya arrintaas:

فعن أم المؤمنين عائشة (رضي الله عنها) قالت : (لَوْ شِئْنَا أَنْ نَشْبَعَ شِبْعًا، وَلَكِنَّ مُحَمَّدًا (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) كَانَ يُؤَثِّرُ عَلَيَّ نَفْسِهِ)

Caa'isho mu'miniinta hooyadooda – *Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inay tiri: (**haddaan rabi lahayn waan dhergi lahayn, laakin (Nabi) Muxamed wuxuu ka dooranjiray (dad kale) naftiisa**)

Wuxuu Ahaa mid naftiisa ehelkiisa dadka kale ka doorto iyagoo aad ugu baahan,

وعن أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ (رضي الله عنه) قَالَ : بَيْنَمَا نَحْنُ فِي سَفَرٍ مَعَ النَّبِيِّ (صلى الله عليه وسلم) إِذْ جَاءَ رَجُلٌ عَلَى رَاحِلَةٍ لَهُ قَالَ : فَجَعَلَ يَصْرِفُ بَصْرَهُ يَمِينًا وَشِمَالًا ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ (صلى الله عليه وسلم) : (مَنْ كَانَ مَعَهُ فَضْلٌ ظَهَرَ فَلْيَعُدْ بِهِ عَلَيَّ مَنْ لَا ظَهَرَ لَهُ ، وَمَنْ كَانَ لَهُ فَضْلٌ مِنْ زَادٍ فَلْيَعُدْ بِهِ عَلَيَّ مَنْ لَا زَادَ لَهُ) ، قَالَ : فَذَكَرَ مِنْ أَصْنَافِ الْمَالِ مَا ذَكَرَ حَتَّى رَأَيْنَا أَنَّهُ لَا حَقَّ لِأَحَدٍ مِنَّا فِي فَضْلٍ .

Waxaa laga wariyay Abuu Saciid Alkudri – *Ilaahay raalli haka noqdee* - inuu yiri: annagoo safar kula jirno

nabiga waxaa u yimid nin oo saaran rati wuxuu yiri: araggiisa midig iyo bidix ayuu u rogrogayay wuxuu yiri rasuulka: **(qofka haysto gaadiid dheeraad qofkaan haysanin ha ugu deeqo, qofkii haysta sahay dheeraad ah ha ugu deeqo qofkaan haysanin)** wuxuu yiri: noocyo badan hantida ayuu sheegay ilaa aan ka aragno inaan xaq u lahayn dheeraadka inaan haysano.

وفي الصحيحين عن عائشة (رضي الله عنها) قالت: جاءني مسكينةٌ تحمِلُ ابنتينَ لها ، فأطعمتها ثلاثَ تمراتٍ ، فأعطتُ كُلَّ واحدةٍ مِنْهُمَا تَمْرَةً وَرَفَعْتُ إِلَى فِيهَا تَمْرَةً لَتَأْكُلَهَا ، فَاسْتَطَعَمَتَهَا ابْنَتَاهَا ، فَشَقَّتْ التَّمْرَةَ الَّتِي كَانَتْ تُرِيدُ أَنْ تَأْكُلَهَا بَيْنَهُمَا ، فَأَعْجَبَنِي شَأْنُهَا ، فَذَكَرْتُ الَّذِي صَنَعْتُ لِرَسُولِ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) فَقَالَ : (إِنَّ اللَّهَ قَدْ أَوْجَبَ لَهَا بِهَا الْجَنَّةَ ، أَوْ أَعْتَقَهَا بِهَا مِنَ النَّارِ)

Labada sixiix (Bukhaari iyo Muslim) waxaa kusoo arooray xadiis laga wariyay Caai'sho –*Ilaahay raalli haka noqdee* -waxay tiri: waxaa ii timid haweeney miskiin ah oo labo gabar wadadata seddex timir ayaan siiyay, waxay siisay labadii gabdhood mid kaste hal timir, timirta seddexaadna afkeeda ayay u wadday say u cunto labadii gabdhood ayaa ka dalbaday inay cunaan, way u kala goysay timirtii ay cuni lahayd, arrinkeeda ayaan ka

helay, waxaan u sheegay wixii ay sameysay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -wuxuu yiri: **(Ilaahay jannada ayuu ugu waajibiyay ama naarta ayuu kaga xoreeyay)**, Haddii sidan uu yahay abaalka qof ilmaheeda ka dooratay nafteeda maxaad u malaynaysaa qof ka dooranaya naftiisa qof taag daran iyo qof baahan iyo qof miskiin ah?.

Waa kanaa Cusmaan bin Cafaan –*Ilaahay raalli haka noqdee* - sanadkii Ramaad (caam ramaad), muslimiinta oo ku dhacay faqri iyo gaajo, ganacsigiisa ayaa kasoo galay shaam, wuxuuna ka koobnaa kun rati oo ku raran bur iyo saliid iyo sabiib, waxaa u yimid ganacsatada Madiina, wuxuu ku yiri: maxaad rabtaan? waxay dhaheen waad og tahay waxaan rabno ee naga iibi badeecada kuu timid, waxaad og tahay siday dad ugu baahan yihiin, wuxuu yiri: kalgacal iyo sharaf kusoo dhowaada, immiisaad ii faa'ideynaysaan?, waxay dhaheen halka dirham laba ayaan kaaga dhigeynaa, wuxuu yiri; waxaa layga siiyay intaas in kaban, waxay dheheen afar, wuxuu yiri: in ka badan ayaa layga siiyay, waxay dhaheen Abuu Camrow ganacsato aan annaga ahayn Madiino ma joogto, qof naga soo hormarayna ma jiro, yuu yahay qof ka ku siiyay, wuxuu yiri Ilaahay ayaa mid kaste iga siiyay toban maka siyaadin kartaan? waxay dhaheen maya wuxuu yiri: Ilaahay waxaan markhaati galinayaa awrtan waxa ay soo qaadday inuu yahay

sadaqo dar Alle ah oo la siinayo masaakiinta muslimiinta iyo danyartooda

Markii nabiga asxaabtiisa u tilmaamay iibsashada ceelka Ruuma, waxaa iska lahaa nin Yahuudi ah, biyaha ceelka ayuu lacag qaali ku gadi jiray, wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(مَنْ يَشْتَرِي بئرَ رُومَةَ فَيَكُونُ دَلْوُهُ فِيهَا كَدَلَاءِ الْمُسْلِمِينَ)

(Yaa iibsanaya ceelka Ruuma wadaantiisana ay ahaanayso sida wadaanta mulimiinta) cusmaan ayaa u yimid ninka yahuudiga wuuna la gorgortamay, wuu diiday inuu ceelka dhamaantiisa iibiyo nuskiisa ayuu ka iibsaday, wuxuu ka siiyay labo iyo toban kun dirham, wuxuuna u waqfay muslimiinta, maalin waxaa iska lahaa sayidnaa Cusmaan maalinna yahuudiga, maalinta Cusmaan muslimiinta waxay arooran jireen in ku filan labo maalmood, markuu arkay yahuudiga arrinkaas wuxuu yiri: ceelkayga waad iga halleysay ee nuska kale iga iibso, wuxuu ka siiyay cusmaan siddeed kun dirham, taasna waxay ahayd u hogaansamidda amarka rasuulka wuxuuna u iibsaday ku dadaalidda maslaxada guud ee muslimiinta.

waqtiga sayidnaa Cumar bin alkhadaab –*Ilaahay raalli haka noqdee* - markuu dadka ku yaraaday masjidka

xaramka, wuxuu ku qasbay dadka iska leh guryaha deriska la ah masjidka inay guryahooda iibiyaan, wuxuu ku yiri: "idinkaa kacbada ku kor degay ee kacbada ma idinku kor deign", sidaas oo kale ayuu sameeyay sayidnaa Cusmaan arrinkan mar kale wuxuu yiri: "waxaa idinkukay dhiirriyay dulqaadkeyga, Cumar baa idinku sameeyay sidaas maydaan hadlin", markaas ayuu dadkii xiray asoo edbinaya, taasoo tusinaysa inay bannaan tahay milkiyada shakhsiga in loo wareejiyo maslaxadda guud, sida ballaarinta jidadka iyo qubuuraha iyo dhisidda masaajidda iyo dhufeysyada, mu'asasooyinka dadka ka dhexeeya, sida isbitaallada iyo dugsiyada iyo hoyga iwm., maxaayeelay maslaxadda guud ayaa laga hormariyaa maslaxadda gaar, Sidaas oo kale waxaan adkeynaynaa in fahanka saxan ee diinta uu keenayo inay ka mid yihiin qaababka maslaxadda guud oo diinta ku boorrisay in la ilaaliyo xaaladda dadka iyo waaqacooda, arrimaha siday u kala mudan yihiin loo kala hormariyo iyadoo la eegayo baahida bulshada tan ugu daran, haddii ay bulshada u baahan tahay dhisidda isbitaallada iyo qalabeyntooda si loogu daaweeyo dadka saboolka ah iyo daryeelkooda mudnaanta arrinkaas ayaa iska leh, haddii ay bulshada u baahan tahay dhisidda dugsiyada iyo macaahidda iyo dhowriddooda iyo qalabeyntooda iyo waxsiinta ardayda iyo daryeelkooda, mudnaanta arrinkaas ayaa iska leh, haddii baahi loo qabo

fududeynta guurka dadka dhibban iyo in deynta laga gudo dadka deyn lagu leeyahay iyo kurbada in laga qaado dadka qaan loo haysto, mudnaanta arrinkaas ayaa iska leh.

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa sayidkeena Muxamed ah isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa oo dhan.

Walaalaha islaamka ahow:

Islaamka wuxuu ilaaliyay arrimaha siday ukala mudan yihiin xitaa hadduu yahay camalka suuban, wuxuu faray marka lakala fadilayo in laga hormariyo maslaxadda guud tan gaarka ah, waayo maslaxadda guud waxtarkeeda wuu gudbaa, laakin midda shakhsiga waxtarkeeda qofkeeda ma dhaafo, haddii nin ka shaqaynayo mu'saso, shaqadiisana ku qaato mushaar

habeenkiina soojeed macnadarro ku dhammeysto, kaddib maalinta markii la gaaro shaqadiisa aadayo asoo aad u daalan, waajibka saarnaana aan uga soo bixin sida laga rabay, marka dartiisa ay u waxyeelowday danta guud iyo danta dadka mu'sasada ay u adeegeyso, sow ma aha middaas daycida amaanaada, iyo in dadka hantidooda oo baadil lagu cuno, iyo ka gaabin mas'uuliyadda loo dhiibay? qofka sidaas ayuu ku dayacay waajibka saarnaa isagoo ku mashquulay waxan waajib ku ahayn, arrinkan shaki kuma jiro inuu yahay fahan la'aanta ujeeddada diinta, maxaa ka fiican siyidinaa Abuu bakar –*Ilaahay raalli haka noqdee* - maalintii gogosha geerida uu saarnaa oo uu kula dardaarmay sayidinaa Cumar dardaaran uu ka mid ahaa hadalkan:

"واعلم أن الله عملاً بالليل لا يقبله بالنهار، وعملاً بالنهار لا يقبله بالليل، وأنه لا يقبل النافلة حتى تؤدى الفريضة".

"Ogow Ilaahay inuu leeyahay camal habeenka la qabto oo uuna aqbalaynin dharaartii, camalna maalintii la qabto oo uuna aqbalaynin habeenkii, mana aqbalyo sunno haddaan waajib la gudanin"

Fahanka saxa ah ee diinta Ilaahay wuxuu la socdaa waaqaca casrigeena, wuxuu dhowrayaa xaaladda dadka iyo baahidooda, oo keenaysa inuusan fahanka ku

ekaanin mas'alooyinka axkaamta ee fiqiga qaarkooda, tusaale ahaan, in lasoo guuriyo ama la qaato iyadoon gudaha loo sii galin ama la fahmin fiqiga maqaasidda ama fiqiga kala mudnaanta ama waaqaca ama waxa la heli karo, hadafka ugu weyn ee maqaasidda sharciga ayaa halkaas ka baxayo.

Iyadoo laga duulayo fahanka maqaasidda ee awaamirta diinta xaniifka, iyadoo la nidaaminayo fiqiga kala mudnaanta, waxaan adkeynaynaa in laga hormariyo fulinta dadka danahooda iyo bulshada ayaa kaga habboon in xaj iyo cumro lagu celceliyo, maxaayeelay fulinta danaha dadka sida in loo fududeeyo qof dhibban oo dantiisa loo fulinayo ama in lagu sadaqaysto sabool oo la kaafiyo, ama in lasoo daayo qof qaan loo haysto, waa fardi kifaayo, waxaa la og yahay in fardu kifaayaha la qabto waxaa laga hormariyaa sunnooyinka oo dhan, taasoo ay ku jirto ku celcelinta xajka iyo cumrada.

Maxaa inooga baahi badan inaan fahanno diinteena fahan sax ah, inaan waaqaceena ogaano ogaansho wacyi leh, taasoo naga dhigayso kuwa qiyaasi kara intay la eg tahay halista nagu wareegsan, fahan naga dhiga kuwa ka hormariya maslaxadda guud maslaxadda gaar si daacadnimo leh annagoo diinteena u hoggaansan oona raba inuu dalkeena hormaro oo kor noqdo oo la geeyo meesha ku habboon isaga iyo dadkiisa.

**Ilaahayow ka ilaali dalalka islaanka iyo qaramadooda
iyo ciidankooda iyo nabadsugiddooda waxkastoo xun**